

## Hannaanka TOT

Waxaan hoos ku soo koobnay hannaankeenna Tababarka Tababarayaasha (TOT) oo dhan anagoo ku dadaalayna in aan tababarayaasha si buuxda ugu soo bandhigno hannaankeenna. Fadlan iimayl ugu dir Matt Evans cinwaankan MattE@childcareawaremn.org ka wac 651-290-9704 (x111) haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan hannaankeenna TOT.

1. Marka taariikhda TOT la aqoonsado waxaa lagu soo daabacayaa kalandaariyaha TOT.
2. Soo-dhejinta TOT kasta waxaa ka mid noqon doona cinwaanka manhajka, taariikhaha, wakhtiyada, kharashka, qaabka bixinta (fool ka fool ama online-ka), sharaxaad gaaban ee ah waxa ku jira manhajka, shahaadooyinka tababaraha ee ugu yar iyo xiriirka arjiga ama codsiga.
3. Codsashooyinka tababaraha ayaa la aqbali doonaa iyadoo loo marayo taariikhda xiritaanka codsiga. Waa muhiim in looga jawaabo su'aal kastoo ku saabsan codsigasi cad maadaama uu si toos ah ula xiriiro aasaaska la qiimeyn doono inta lagu guda jiro hannaanka xulashada iyo baaritaanka. Tababarayaasha waa in ay soo gudbiyaan codsi cusub oo loogu talagalay TOT kasta.
4. Haddii aadan ka soo bixin aqoonta iyo shuruudaha tababaraha ugu yar ee la muujiyay ee loogu talagalay TOT balse aad jeclaan lahayd in lagu tixgeliyo ka-qaybgalka iyadoo sabab u ah in aad aaminsan tahay in aad leedahay xaalad gaar ah, waxaad buuxin kartaa oo aad soo gudbin kartaa Codsi loogu talagalay Tixgelinta Gaarka ah marka la heli karo oo dheeraad ku ah codsigaaga.
5. Guddi khabarro ah ayaa isticmaalaya tilmaamo qiimayn jaango'an si ay dib-u-eegis ugu sameeyaan dhammaan codsashooyinka iyo Codsiyada loogu talagalay Tixgelin Gaar ah. Codsadayaasha waxaa loo xulan doonaa ka-qaybgalka iyadoo lagu saleyn doono arrimo kala duwan oo lala xiriirinayo baahiyada gaarka ah ee bulshooyinka gobolka oo dhan.
6. Tababarayaasha waxaa lagu ogeysiyaa tooska iimaylka marka la gaaro taariikhda ogeysiiska ee lagu qoray kalandaariyaha TOT haddii codsigooda loo xushay ama aan loo xulan ka-qaybgalka TOT-ka.
7. Koox sugitaan oo diyaar ah ayaa la diyaarinayaa. Haddii tababare uu diido casuumaad uu kaga qaybgalayo TOT-ga, booska waxaa buuxin kara musharax ka socda kooxda sugitaanka ee diyaarsan.
8. Tababarayaasha loo xushay in ay ka qaybgalaan waa in ay dhammeystiraan diiwaangelintooda iyagoo soo gudbinaya lacag-bixintooda oo dhammeystiran kama dambeys labba toddobaad ka hor taariikhda uu bilaabanayo TOT-ga.
9. Baajinta iyo Lacag-celinta:
  - Tababaraha waxaa keliya si guul leh loogu diiwaangeliyaa TOT marka lacag-bixinta la helo iyadoo dhammeystiran.
  - Tababarayaasha waa in ay sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtagalka ahi u dhammeystiraan isu diiwaangelintooda ee TOT ka-dib marka ay helaan ogeysiis iimayl ah oo sheegaya in codsigooda la aqbalay. Diiwaangelinta waxay xirmaysaa labba toddobaad ka hor bilowga TOT.
  - TOT-ga leh diiwaangelinnada ugu yar waa la baajin doonaa ama dib ayaa loo jadwaleyn doonaa. Haddii ay dhacdo TOT in la baajiyo, ka-qaybgalayaasha

waxaa la ogeysiin doonaa kama dambays hal toddobaad ka hor bilowga TOT waxayna heli doonaan lacag-celin buuxda.

- Tababarayaasha waxay ka bixi karaan ama heli doonaan lacag-celin buuxda ilaa hal toddobaad ka hor bilowga koorsada. Codsadaha ka baxa TOT-ga ka-dib taariikhda kama dambayska ah ee halka toddobaad ma heli doonaan lacag-celin. Haddii ka noqoshada TOT-ga ay tahay lagama maarmaan fadlan na soo ogeysii wakhtiga ugu horreeya ee suurtagalka ahi si tababare kale uu u buuxiyo booska.